Warbixin Adiga Laguu Hayo...

# Barnaamijyada Dowladdu Maalgeliso ee Daryeelka Wakhtiga Dheer

**(Tell Me More About... Enrolling in Publicly Funded Long-Term Care Programs)**

Daryeelka wakhtiga dheer waa adeeg ama caawimaad kasta oo uu qof ugu baahan karo marka uu gaboobo ama uu yahay naafo oo uusan qabsan karin hawlaha nolosha ee maalin kasta. Waxyaabahaas waxaa ka mid ah qubeyska, labbiska, kariska cuntada, shaqo-aadid, iyo sida la isaga bixiyo biilasha.

Dadka raba in ay ogaadaan waxyaabaha ay kala dooran karaan ee daryeelka wakhtiga dheer waa in ay la xiriiraan local aging and disability resource center (xarunta taakuleynta waayeelka iyo naafada ama ADRC) ama tribal aging and disability resource specialist (shaqaalaha arrimaha qabiilka ee waayeelka iyo naafada ama ADRS), meeshii ay ka heli karaan. Xafiisyada ADRC iyo kuwa qabiilka ADRS qof kasta ayaa imaan kara, haddii xaq lagu leeyahay iyo haddii aan xaq loogu lahayn barnaamijyada dowladdu maalgeliso ee daryeelka wakhtiga dheer ama Medicaid kale. Barnaamijyada dowladdu maalgeliso ee daryeelka wakhtiga dheer waa Family Care; Include, Respect, I Self-Direct (Barnaamij Taakuleyn ah oo Qofku Hagayo Adeegyadiisa ama IRIS); Partnership; iyo Program of All-Inclusive Care for the Elderly (Barnaamij ah Daryeelka Isku-dhafan ee Waayeelka ama PACE). Waxay qaadan kartaa hal ilaa saddex bilood si loo go'aamiyo xaqu-yeelashada iyo si la isugu qoro barnaamij wakhti dheer soconaya.

Si xaq loogu yeesho barnaamijyada wakhti dheer, waa in ay dadku:

- Gaaraan 65 sano oo ay yihiin naafo.
- Ka soo baxaan shuruudaha deggenaanshaha ee Wisconsin.
- U baahan yihiin adeeg daryeel oo soconaya wakhti dheer oo ay buuxin karaan shuruudaha xaqu-yeelashada jir ahaaneed.
- Ka soo baxaan gebi ahaan shuruudaha dhaqaalaha.

Dadka loo qabanayo daryeelka wakhtiga dheer waxaa laga rabi karaa qeyb ahaan kharashka daryeelka wakhtiga dheer ee ay isku qoraan. Xafiiska la socda dhaqaalaha ayaa go'aamin doona qeyb ahaan kharashka la iska rabo, haddii ay sidaas dhacdo. Xafiisyada ADRC ama ADRS qabiilka ayaa shuruudaha dadka u sharxaya.

Marka la go'aamiyo daryeelka wakhtiga dheer xafiisyada ADRC ama ADRS qabiilka ayaa haya macluumaadka waxyaabaha la kala dooran karo. Waxaa la kala dooran karaa Family Care, IRIS, Partnership, ama PACE. Waxa kale oo la kala dooran karaa adeegyo hadba in la bixiyo kharashka ee Medicaid ama adeegyo meelo gaar ah oo kharashkooda la siiyo.

## Shuruudaha Diiwaangelinta

### 1. Xaqu-yeelashada Jir Ahaaneed

Xafiisyada ADRC ama kuwa qabiilka ADRS ayaa dadka u imaanaya si ay ugu sameeyaan Long-Term Care Functional Screen (Baarista Daryeelka Wakhtiga Dheer ee Jir Ahaaneed). Baaristu waa qiimeynta heerka baahida adeegyada iyo go'aaminta xaqu-yeelashada jir ahaaneed ee barnaamijka dowladdu maalgeliso ee wakhtida dheer.

### 2. Xaqu-yeelashada Dhaqaale Ahaaneed

Haddii aad si buuxda u haysato kaarka ceymiska Medicaid, uma baahnid buuxinta codsiga dhaqaalaha, laakiin waa in aad ka soo jawaabto su'aalo dheeraad ah oo lagu hubinayo in aad ka soo bixi karto shuruudaha xaqu-yeelashada dhaqaalaha ee barnaamijka dowladdu maalgeliso ee wakhtida dheer.

Haddii aadan si buuxda u haysan kaarka ceymiska Medicaid, xafiisyada ADRC ama kuwa qabiilka ee ADRS ayaa kugu caawinaya in aad la xiriirto xafiiska dakhliga la socda iyo waxyaabo kale oo dheeraad ah oo la xiriira codsiga lagu go'aaminayo xaqu-yeelashada dhaqaale ahaaneed.

### 3. La-taliyaha Diiwaangelinta

Xafiisyada ADRC ama kuwa qabiilka ee ADRS ayaa kuu sheegaya waxyaabaha aad ku heleyso iyo waxa macnihiisu yahay markaad isku qorto oo aad gasho barnaamijka dowladdu maalgeliso ee wakhtida dheer. Xafiisyada ADRC ama kuwa qabiilka ee ADRS ayaa kuu buuxinaya waraaqaha diiwaangelinta ama gudbinta haddii aad isku qoreyso. Taariikhda diiwaangelinta ama gudbinta waxaa la go'aaminayaa markay socoto talada diiwaangelinta. Taariikhda diiwaangelinta ma noqon karto mid la soo dhaafay.

Haddii aad rabto in aad isku qorto barnaamij daryeel wakhti dheer xafiisyada ADRC ama kuwa qabiilka ADRS ayaa waraaqaha kuu buuxineysa ama habka la isugu gudbiyo, kugu caawineysa habraaca gudbinta, oo dabadeedna ogeysiineysa managed care organization (ceymiska daryeelka maamula ama MCO) ama IRIS consultant agency (xafiiska la-taliyaha IRIS ee ICA) ee kugu qoraya ama taariikhda gudbinta. Saddex maalmood gudahood taariikhda laguu gudbiyo, MCO ama ICA ayaa kula soo xiriireysa si ay kaala shaqeeyaan qorshaha adeegyada iyo taakuleynta.

## Barnaamijyada Dowladdu Maalgeliso ee Daryeelka Wakhtiga Dheer ee Deegaankaaga

Qeybtan waxaa si kooban loogu faahfaahinayaa barnaamijyada laga helo meesha aad ku nooshahay. Xafiisyada ADRC ama kuwa qabiilka ADRS ayaa wax badan kaaga sheegi doona macluumaad dheeraad ah marka la go'aamiyo in aad xaq u leedahay jir ahaan iyo dhaqaale ahaan.

### Family Care

Family Care waa barnaamij wakhti dheer oo ah Medicaid oo loogu tala galay waayeelka iyo dadka waaweyn ee qaba naafannimo ah jirka, maskaxda, ama garaadka. Family Care waxaa lagu helaa adeegyo daryeel wakhti dheer oo dadka ku caawinaya iyaga oo joogo gurigooda marka ay u suuroobeyso. Family Care waa barnaamij lagu helo adeegyo daryeel wakhti dheer oo badan, oo gebi ahaan dadka loo qaban karo wakhtiyo kala duwan. Dadka qabiillada Menominee iyo Oneida waxay xaq u yeelan karaan adeegyo ah in qabiil ahaan loogu maamulo kiisaskooda Family Care.

Haddii aad jir ahaan xaq ugu yeelato daryeel heerkiisu yahay mid ka baxsan xarun, waxaad xaq u yeelan doontaa adeego xadeysan.

### Partnership

Partnership waa barnaaij wakhti dheer oo ah Medicaid oo loogu tala galay waayeelka iyo dadka waaweyn ee qaba naafannimo ah jirka, maskaxda, ama garaadka. markay xaq u leeyihiin daryeel ah heerka xarunta. Barnaamijka Partnership waa hab ah daryeel badan oo la isu geeyey sida adeegyo ah daryeelka wakhtiga dheer socda ee bulshada dhexdeeda, kuwa lagu helo xarun gudaheeda iyo goobo lagu nool yahay, dhakhtar, isbitaal, daawo, dhakhtarka ilkaha iyo daryeelka kale ee caafimaadka.

### Program of All-Inclusive Care for the Elderly (Barnaamij ah Daryeelka Isku-dhafan ee Waayeelka ama PACE)

Barnaamijka PACE waa sida Partnership, oo waa isugeynta adeegyada daryeelka, daryeelka caafimaadka guud (dhakhtarka joogtada ah iyo xaaladaha degdegga ah), iyo daawooyinka dhakhtarka. PACE waxaa heli kara dadka gaaray 55 ama ka weyn, ee ka soo baxa heerka daryeelka xarumaha, ee ku nool deegaamada Kenosha, Milwaukee, Racine, ama Waukesha. Adeegyada PACE caadi ahaan waxaa lagu bixiyaa xarun ah PACE oo ay weheliso daryeelka guriga ama goob qofku doorto.

### Include, Respect, I Self-Direct (Barnaamij Taakuleyn ah oo Qofku Hagayo Adeegyadiisa ama IRIS)

IRIS waa barnaamij ah waayeelka iyo dadka waaweyn ee ah naafada oo ay iyagu ku hagayaan daryeel ay u baahan yihiin oo ah heer xarun lagu helo. IRIS waa in loo raaco sharciyo go'aan shakhsiyeed oo uu qofku hagayo. Barnaamijka IRIS miisaaniyad lacageed ayaa dadka loogu go'aamiyaa baahida daryeelkooda wakhtiga dheer. Adiga ayaa go'aansanaya waxyaabaha, caawimaadda, iyo adeegyada ay dantu kuugu jirto, oo adigoo eegaya miisniyadda lacagtaada ayaad sameysaneysaa qorshe ah caawimaad iyo adeeg oo aad u baahan tahay. Adeegyada IRIS waa kuwa caawinaya wixii noloshaada u fiican.